

Waxbarashada dadka waaweyn waxay dadka ku casuumaysaa adeega maktabada iyadoo qofku aanu joogin goobta

Iyadoo ay sabab u tahay khatarta guud ee faafinta Karoona iyo cudurka covid-19 waxaa Waxbarashada dadka waaweyn ay dadka ku casuumaysaa adeega maktabada iyadoo qofku aanu joogin goobta, laga bilaabo isniinta 6-da Abriil 2020 ilaa iyo 31-ka Maay 2020. Qolalka waxbarasho way xiranyihiin ilaa iyo 31-ka Maay 2020.

Sidee ayaan u amaahanayaa buugta?

1. La xiriir maktabada iyadoo loo marayo telafoon ama ii-mayl.
2. Sheeg magaca iyo lambarka shakhsiga ah.
3. Sheeg nooca buuga aad doonaysid inaad amaahato, ama haddii aad doonaysid inaanu kuu ururino dhowr buug.

Nagala soo xiriir dhanka telafoonka iyo ii-maylka

Wakhtiyada telafoonka

Isniin ilaa khamiis: 09:00-13:00

Telafoon lambarka: 011 153914.

Ii-maylka: kompvuxbib@norrkoping.se

Sidee ayaan u helayaa buugtayda?

Maktabada ayaa kuu soo sheegaysa marka buugtaadu diyaar u yihiin soo qaadasho.

Waxaad buugtaada ka soo qaadanaysaa kadinka iskoolka isniin ilaa khamiis:
08:00-15:00

U fiirso in magacaagu ku qoranyahay bacdan markaad soo qaadanayso waxaad dalbatay.

Dib u soo celinta buugta

Dhamaan buugta waxaa la kordhiyay wakhtigoodi dib loogu soo celinayay ilaa iyo 12-ka Juun 2020.

Haddii aad doonaysid inaad soo celiso buug waxaad tani samaynaysaa adigoo buugtan ku ridaysaa maktabada sanduuqeeda dib u soo celinta kaas oo yaala kadinka maktabada, isniin ilaa khamiis: 08:00-15:00

”Balanso shaqaale maktabad”

Balanso 30 daqiiqo gaar kuu ah adigoo u maraya telfoonka ama ii-maylka sida caadiga ah, laakiin adeegan waxaa lagu bixinayaa dhanka telfoonka.

Balanso shaqaale maktabad looguna talagalay:

- Talo-bixinta buugta iyo akhriska
- Raadinta macluumaad iyo iska hubinta ilaha wararka

Haddii aad leedahay hoos u dhac akhriska ah una baahantahay isticmaalka aabka Legimus si aad u akhrido buugta codka waxaad la xiriiraysaa macalinkaaga si aad u hesho caawimaad.

Koobiyaynta buugta

Haddii aad u baahantahay inaad koobiyayso dhowr warqadood oo ka mid ah buug ama buugta koorsooyinka markaasi waanu ku caawinaynaa. Qofku wuxuu koobiyayn karaa ugu badnaan 15 bog hal wakhti sida ku cad sharciga Dhawrista xuquuqda qoraaga.

Wac ama soo dir ii-mayl kuna sheeg nooca buuga iyo tirada boggaga aad doonaysid inaad koobiyayso markaasi waxaad soo qaadanaysaa iyagoo ku jira bac taala kadinka iskoolka, isniin ilaa khamiis 08:00-15:00.